

TALLAALKA PNEUMOCOCCAL CONJUGATE

WAXA AAD U BAAHANTAHAY IN AAD OGAATO

1 Cudurka Pneumococcal

Caruurta waxay jirro xun ka qaadi karaan infakshanka ay keento bakteeriyada *Streptococcus pneumoniae*

Waxay keentaa infakshanno ku dhaca dhiigga, pneumonia (cudur sambabada gala), meningitis, oo u badan caruurta yaryar. (Meningitis waa infakshan ku dhaca xuubka maskaxda ku daboolan.) Inkastoo pneumococcal meningitis aysan badnayn marka loo eego kuwa kale (sannad kiiba ka yar hal kiis 100,000 oo qafba), qiyaastii 10kii ilmoodba wuxuu dilaa hal.

Pneumococcal meningitis wuxuu kaloo keeni karaa dhibaatooyin kale ee caafimaad, oo ay ka mid yihiin dhega beel iyo maskaxda oo ay wax gaaraan.

Kahor intaan si caadi ah loo isticmaalin tallaalka Pneumococcal conjugate, infakshanada Pneumococcal waxay keeni jireen:

- 700 oo kiis oo meningitis ah ka badan,
- 13,000 infakshano dhiigga ah,
- qiyaastii 5 malyan oo ah infakshanada dhegaha, iyo
- qiyaastii 200 oo dhimasho ah

sannadkiiba caruurta ka da' yar shan sano Maraykanka gudihiiisa.

Caruurta ka da' yar 2 sano waxay halis wayn ugu sugan yihiin in cudur xuni ku dhaco marka loo fiiriyo kuwa ka waawayn.

Bakteeriyada Pneumococcal waxay ku fidaa qof taabasho ku qaadsiiya qof kale.

Way adkaan kartaa in la daaweeyo Infakshanada Pneumococcal sababta oo ah noocyo ka mid ah bakteeriyada ayaa u adkaysta daawooyinkii lagu daawayn lahaa. Arrintani waxayba aad muhiim uga dhigaysaa in infakshanada Pneumococcal lagaga hortago tallaalka.

2 Tallaalka Pneumococcal conjugate (PCV13)

Waxaa jira in ka badan 90 nooc oo ah bakteeriyada pneumococcal. Tallaalka cusub ee pneumococcal conjugate (PCV13) wuxuu difaaca 13 kuwaas ka mid ah. Noocyadan bakteeriyada ahi waxay mas'uul ka yihiin infakshanada Pneumococcal kuwooda ugu xun ee caruurta ku dhaca badankood. PCV13 wuxuu bedelayaa tallaalkii conjugate (PCV7) ee hore, kaasoo difaacayay 7 nooc oo ah Pneumococcal waxaana la isticmaalayay illaa sanadkii 2000. Mudadaas gudaheeda cudurada xun ee pneumococcal waxay hoos u dheceen 80% caruurta ka da' yar 5 sano.

PCV13 waxaa kaloo laga yaabaa in ay kahor tagto waxy-

aabo keena pneumonia iyo infakshanada dhegaha. Laakiin pneumonia iyo infakshanada dhegaha waxaa keena wax yaabo badan, PCV13-na waxa kaliya oo ay difaacdaa waa noocyada bakteeriyada pneumococcal ee tallaalka loogu talagalay.

PCV13 waxaa la siiyaa dhallaanka iyo socod- baradka, si ay uga difaacdo cudurada xun oo ay keento bakteeriyada pneumococcal wakhtiga ay halista ugu wayn ku sugan yihiin.

Caruurta waawayn ee qabta cudura ku gaamuray (muddo dheer ay qabeen) waxaa laga yaabaa in ay qaataan tallaalka ka duwan oo la yiraahdo PPSV23, kaas oo u dheer qaadashada PCV13. Waxaa jirta Vaccine Information Statement (Warqadda Warbixinta Tallaalka) oo aan ahayn middan tallaalkaasuna leeyahay.

3 Yaa ay tahay in uu qaato tallaalka PCV13 goormana?

Dhallaanka iyo Caruurta ka Da' Yar 2 Sano Jir
Tallaalka PCV13 waxaa lagu talinayaa in caruurta laga siiyo **4 dose** oo isku xiga, hal dose mararka da'da ilmuhu tahay: 2 bilood, 4 bilood, 6 bilood, iyo 12 illaa 15 bilood.

Caruurta tallaalka gaftay ee aan ku qaadan da'daas wali waa in tallaalka la siiyaa. Inta dose iyo mudada u dhexaynaysa dose-yada waxay ku xiran tahay da'da ilmaha. Waydii daryeel bixiyahaaga wixii faahfaahin ah.

Caruurta tallaalkada isku xiga ku bilaabay PCV7 waa in ay ku dhamaystiraan tallaalkada isku xiga qaybta ka dhimman PCV13.

Caruurta Waaweyn iyo Qaangaarka

- Caruurta caafimaadka qabta ee da'doodu u dhexayso maalintii ay 2 jir noqdeen iyo maalinta ay 5 jir noqon lahaayeen oo aan dhamaystiran tallaalkada isku xiga ee PCV7 ama PCV13 inta aysan gaarin 2 sano jir, waa in ay qaataan 1 dose.
- Caruurta da' doodu u dhexayso maalintii ay 2 jir noqdeen iyo maalinta ay 6 jir noqon lahaayeen ee qaba cuduro sida:
 - cudurka sickle cell
 - aan lahayn xoorxoor/beer-yaraha (spleen) ama ay jirran tahay
 - la geliyay jirkiisa aaladda cochlear (aaladda maqalka),
 - cudurka sokorta (sokoroow),
 - HIV/AIDS ama cuduro kale oo waxyeela habdhiska difaaca jirka (sida kansar, ama cudurada beerka), ama
 - Cudurada wadnaha ama sambabka oo muddo dheer jiray,ama qof qaata daawooyin waxyeela habdhiska difaaca jirka, sida daawooyinka caburiya difaaca jirka

(immunosuppressive) ama steroids, waa in uu qaataa **1 dose oo ah PCV 13** (haddii ay qaateen 3 dose oo ah PCV7 ama PCV13 khor itii aysan 2 sano jir noqon), ama **2 dose oo ah PCV13** (haddii ay qaateen 2 dose ama ka yar oo ah tallaalka PCV7 ama PCV13).

Dose ah PCV13 ayaa laga yaabaa in la siiyo caruurta iyo da'yarta ay haystaan xaalado caafimaad qaarkood oo da'dooduna u dhexayso 6 illaa 18 sano, xittaa haddii ay horay u qaateen PCV7 ama PPSV23.

Caruurta dhamaystirtay 4ta dose ee isku xiga ee PCV7: Caruurta caafimaadka qabta ee aan wali 5 jirsan, iyo caruurta ay haystaan xaalado caafimaad oo aan wali 6 jirsan, waa in ay ka qaataan PCV13 hal dose oo dheeraad ah,

Waydii daryeel bixiyahaaga haddii aad su'aalo ka qabtid talooyinka midkoodna.

PCV13 waxaa isla mar qofka lala siin karaa tallaalada kale.

4 Caruurta qaarkeed waa in aysan qaadan tallaalka PCV13 ama waa in ay sugaan

Caruurta waa in aysan qaadan PCV13 haddii dose hore ee ah tallaalkan, ama PCV7, ama tallaalka kasta oo ay ku jirto maadada diphtheria toxoid (tusaale, DTaP) ay ku kiciyeen cadaanyo ba'an ama daran (nafta halis gelisa).

Caruurta la ogyahay in maado kasta oo ku jirta PCV7 ama PCV13 ay ku kiciso cadaanyo daran waa in aysan qaadan PCV13. U sheeg daryeel bixiyahaaga haddii ilmahaagu qabo cadaanyo daran.

Caruurta qabta cuduro fudud, sida hargab, waa suurtagal in la tallaalo. Laakiin caruurta qabta jirro dhexdhexaad ah ama xun waa in ay sugaan tallaalka inta ay ka bogsanaayaan.

5 Waa maxay khatarha ka iman kara PCV13?

Daawo dhamaanteed, tallaalkuna ka mid yahay, waxaa suurtagal ah in ay keento dhibaatooyin daran, sida cadaanyo ba'an ama daran oo ay kiciso. Haseyeeshee, halista nooc kasta oo tallaalka ahi uu ku keeni karo dhib weyn, ama dhimasho, aad bay u yartahay.

Daraasadaha la sameeyay, tallaalka PCV13 markii la isticmaalay kadib waxyaabaha uu keenay badankood waxay ahaayeen kuwa fudud. Waxay la mid ahaayeen waxyaabihii la arkay kadib markii la isticmaalay PCV7, kaasoo la isticmaalay illaa iyo sannadkii 2000. Waxyaabaha la soo wariyay waxay ku kala duwanaayeen dose-ka iyo da'da, laakiin celcelis ahaan:

- Tallaalka kadib qiyaasti kala bar caruurta waxay noqdeen kuwa lulaysan, in cabaar ah cuntadii waa diideen, ama meesha irbadda lagu muday ayaa guduudatay ama danqanaysay.
- Qiyaastii 3dii ilmoodba 1 ayaa meesha laga duray barartay.
- Qiyaastii 3dii ilmoodba 1 ayaa qandho fududi qabatay, iyo qiyaastii 20kii ilmoodba 1 ayaa qandha xoog leh qabatay (ka kor 102.2°F).
- Qiyaastii 10kii ilmoodba 8 ayaa noqday kuwo aan xasiloonaayn ama caroon og.

Cadaanyo nafta halis gelisa in tallaalka kiciyo waa dhif. Haddiise ay dhacdo, waxay dhacaysaa waa dhowr daqiiqo illaa dhawr saacadood gudahood marka qofka la tallaalo kadib.

6 Ka waran haddii uu kiciyo cadaanya daran?

Maxaan ku garan karaa?

Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida qandho daran ama qofka oo uu hab-dhaqankiisa isbedelo. Calaamadaha tilmaamaya cadaanyo daran oo uu kiciyay waxaa ka mid noqon kara neefsashada oo dhib noqota, xabeeb ama xiiqlayn, furuuc xanuun leh, midabka oo isbedela, tabar-darro, wadnaha oo aad u garaaca, dawakhaad.

Maxaan sameeyaa?

- Wac takhtar, ama qofka isla markiiba takhtar u gee ama u hel.
- U sheeg takhtarka waxa dhacay, taariikhda iyo wakhtiga sidaasi dhacday, iyo goortii qofka la tallaalay.
- Weydiiso daryeel bixiyahaaga si aad u wariso cadaanyada uu kiciyay buuxina foomka Habka Gudbinta Dhibta Talaalka Keenay (Vaccine Adverse Event Reporting System [VAERS]). Ama waxa aad warbixintan ku gudbin kartaa bogga internetka ee VAERS ahna www.vaers.hhs.gov, ama adigoo wacaya **1-800-822-7967**.

VAERS talo caafimaad ma bixiso.

7 The National Vaccine Injury Compensation Program (Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Tallaalka)

The National Vaccine Injury Compensation Barnaamijka (VICP) waxaa la sameeyay 1986.

Qofkii rumaysan in tallaalka uu dhaacwac gaarsiiyay wuxuu qaansheeg ka diiwaan gelin karaa VICP isagoo wacaya **1-800-338-2382** ama tegaya boggooda internetka ee www.hrsa.gov/vaccinecompensation.

8 Sidee wax intaa ka badan u ogaan karaa?

- Waydii daryeel bixiyahaaga. Waxay ku siin karaan warqadda la socota tallaalka ama waxay kuu sheegi karaan ilo kale oo aad warbixin ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka ee degmadaada ama waaxda caafimaadka ee maamul goboleedka.
- La xiriir Xarumaha Kahortagga iyo La Dagaalanka Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention [CDC]):
 - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
 - Tag bogga internetka ee CDC iyo www.cdc.gov/vaccines



DEPARTMENT OF HEALTH AND HUMAN SERVICES
Centers for Disease Control and Prevention



Vaccine Information Statement (Interim)
PCV13 (4/16/10) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health